# Oggolaanshaha Bukaanka ee Baaritaanka Hidde-sidaha Kansarka – Massachusetts/Minnesota/Wyoming

Fadlan si fiican u akhri oo ugala hadal dhakhtarkaaga.

Haddii aad su'aalo qabto, fadlan kala xiriir Caris PatientNavigator@CarisLS.com ama (888) 979-8669.

**Foomka la buuxiyey iimeyl ahaan ugu soo dir PatientNavigator@CarisLS.com, ama faakis ahaan 866-479-4925.**

## MACLUUMAADKA BAARITAANKA

### Ujeedada Baaritaanka Hidde-sidaha Kanskarka

Baaritaanka hidde-sidaha kansarka ee dhammaystiran ee ay samayso Caris Life Sciences® (Caris) waxa lagu qiimeeyaa calaamadaha laga helo burada ama dhiigga, taasi oo daaha ka rogta raad molikuyuuleed ka caawiya bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga (HCP) inuu qaato go'aano daawayn oo xog-ogaal badan ah oo khaas ku ah kansarkaaga.

**Baaritaanka Hidde-sidaha Dhiigga Kaliya:** Baaritaanka hidde-sidaha munadda(ha) dhiigga Caris waxa ka mid ah baaritaan hidde-side (unugyada galmada/dhaxaleed), taasi oo bixin karta macluumaad ku saabsan haddii kansarkaagu uu yahay dhaxaltooyo iyo halista inaad yeelato noocyo kale oo kansar ah ama dhibaatooyin caafimaad oo kale. Natiijooyinka baaritaanku waxay daaha ka rogaan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan adiga ama qoyskaaga oo lama filaan ah, waxaana dhici karta in natiijooyinka baaritaanku saamayn ku yeeshaan xubnaha qoyskaaga.  Waxa dhici karta inaad doorbiddo inaad marto la talinta hidde-sidaha kahor inta aadan oggolaan baaritaanka. Haddii aad bixiso muunad dhiig oo baaritaan lagu sameeyo, natiijooyinka baaritaanka waxyaalaha qofku dhaxlay waxa ku jiri kara:

*Tognaanta cudurka:* Natiijada tognaanta cudurka waxay muujin kartaa inaad tahay qof sida, aad ugu dhawdahay inaad siddo, ama aad qabto cudurka ama xaaladda lagaa baarayo. Haddii natiijada soo baxday sheegayso inaad cudurka qabto, waxa dhici karta inaad rabto inaad la hadasho bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ama la-taliye hidde-side. Adiga ama xubnaha qoyskaaga waxa dhici karta in loo diro baaritaan dheeraad ah ama xaqiijineed.

*Tabnaanta cudurka:* Natiijada sheegaysa tabnaanta cudurku waxay muujinaysaa in aadan lahayn hidde-side cudur keenaya oo lagu aqoonsaday baaritaanka. Hase yeeshee, natiijada sheegaysa tabnaanta ma dammaanad qaadayso in adiga iyo qoyskaagu aydaan lahayn xaalado hidde-side ama xaalado caafimaad oo kale, iyo in macluumaad dheeraad ah ay diyaar noqon doonaan mustaqbalka taasi oo saamayn karta fasiraadda natiijooyinka baaritaankiina. Hase yeeshee, Caris waajib kuma aha inay cusboonaysiiso, mar kale fiiriso ama mar dambe qiimayso natiijooyinka baaritaanka kadib markii natiijooyinkaaga uu helay bixiyahaaga daryeelka caafimaadka.

### Qaadista Muunadda

Haddii aad oggolaato baaritaan, muunadda(ha) dhiiggaaga iyo/ama nuddaada ayaa loo diri doonaa Caris, halkaasi oo DNA-da iyo RNA-da laga saari doono muunaddaada oo la lafaguri doono.

### Natiijooyinka Baaritaanka

Caris waxay u sheegi doontaa natiijooyinkaaga baaritaanka bixiyaha daryeelka caafimaadka ee ku xusan foomka amarka baaritaanka (iyo bixiyeyaasha daryeelka caafimaadka ee kale ee ay codsadeen kooxda daawayntaada, haddii ay khusayso). Calaamadda natiijooyinka baaritaanka waxay muujin kartaa in calaamadaha baaritaanka la sameeyey laga helay, ama aan laga helin muunaddaada, waxaana la aqoon karaa sifooyin kale oo kansarkaagu leeyahay. Natiijooyinka baaritaankaaga waxaad ka heli kartaa Bixiyahaaga Daryeelka Caafimaadka, ama Caris adigoo gudbinaya codsi qoran sida uu dhigayo sharciga arrintan khuseeyaa.

### Faa'idooyinka, Halisyada, iyo Caqabadaha Baaritaanka Hidde-sidaha

Faa'idooyinka baaritaanka waxa ku jiri kara: (i) macluumaad badan si loo qaato go'aanada daryeelka caafimaadka ee khuseeya adiga iyo xubnaha qoyskaaga, oo uu ku jiro dejinta qorshe maarayn ama daawayn; (i) suurtogalnimada ka diiwaangalin daraasadaha cilmi-baarista; iyo (iii) macluumaad caafimaad oo muhiim u ah xubnaha qoyskaaga.

Waxa dhici karta inaad waajahdo warwar ku saabsan baaritaanka, waxaana dhici karta inaad dareento xanuun kooban oo fudud markaad bixinayso muunadda nudda ama dhiigga. Sidoo kale, in kastoo shuruucda fadaraalka iyo gobolka qaarkood ay xoogaa diidan yihiin takoorka ku salaysan hidde-sidaha ee ka imanaya loo-shaqeeyayaasha iyo shirkadaha caymiska caafimaadka, shuruucdani ma qabtaan xaaladaha oo dhan. Waxaad booqan kartaa www.genome.gov/10002328 si aad u hesho macluumaad ku saabsan Xeerka Takoor La'aanta Macluumaadka Hidde-sidaha, oo ah sharci fadaraal oo ilaaliya macluumaadka hidde-sidaha.

Caris ma dammaanad qaadayso ama ma ballan qaadayso in baaritaankeeda(adeeda) hidde-sidaha lagu ogaanayo dhammaan dhalan-doorsoonka hidde-sidaha iyo dhammaan dadka qaba xaalad hidde-side. Isbaddalada aan la xiriirin xaalad caafimaad waxa dhici karta inaan loo tabin bixiyahaaga daryeelka caafimaadka.

### Qarsoodiga

Xaq ayaad u leedahay in qarsoodi laga dhigo muunadaada(haaga), macluumaadka hidde-sidaha, iyo xogta caafimaadka ee kale, sida ay dhigayaan shuruucda arrintan khusaysaa. Bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ee ku xusan foomka amarka baaritaanka iyo xirfadlayaasha kale ee ay wada -haqeeyaan ama hawl-wadeenada xarunta iyo cidda ay wada-shaqaynta leeyihiin ayay dhici kartaa inay heli karaan muunaddaada iyo natiijooyinkaaga baaritaanka. Bixiyahaaga daryeelka caafimaadku wuxuu sidoo kale Caris u sheegi karaa inay siiso natiijooyinka dhinac kale oo saddexaad. Hawl-wadeenada Caris iyo dadka kale ee u shaqeeya Caris ayay dhici kartaa inay helaan muunaddaada, ay ku sameeyaan baaritaan ama ay helaan xogta caafimaadkaaga iyo natiijooyinka baaritaanka.

### Sii Haynta, Isticmaalka, iyo Wadaagidda Muunadda/Xogta

Ilaa heerka uu oggol yahay sharciga khuseeyaa, Caris waxa dhici karta inay kaydiso, isticmaasho, oo tusto muunadaha(aaga), macluumaadka hidde-side, iyo xogta caafimaadka ee kale cid gudaha ah iyo cid dibadda ah, ujeedooyin hubinta ku dhaqanka sharciga ah, ujeedooyin lacag-bixin, hubinta ama horumarinta tayada, hawlaha hawlgaleed, daraasadaha xaqiijinta, cilmi-baaris, alaab soo saarid, ama daabacaadaha. Caris sidoo kale waxay u isticmaali kartaa macluumaadkaaga inay ku aqoonsato oo kula soo xiriirto markay jiraan tijaabooyin caafimaad iyo fursado cilmi-baaris oo kale oo laga yaabo inaad danaynayso. Muunadahaaga waxa dhici karta in waligoodba la hayo. Caris waxay ka masixi wixii lagu aqoonsan karo muunada(ha), macluumaadka hidde-side, iyo xogta caafimaadka ee kale ilaa heerka ay shuruucdu dhigayaan. Dhinacyada saddexaad ee heli kara muunaddaada(haaga), macluumaadka hidde-side, iyo xogtaada caafimaadka ee kale waxa ka mid noqon kara ururo samafal, kuwa ganacsi, ama kuwo dawli ah sida cilmi-baarayaasha tacliinta, jaamacadaha, isbitaalada, shaybaarada, iyo sayniska noolaha, caymiska, shirkadaha daawada, iyo shirkado kale. Haddii hawlahani dhalaan alaab ganacsi ama macaash nooca uu rabo ha noqdee, adiga ama qoyskaaga waxba laga siin maayo, xataa haddii muunaddaada(haaga), macluumaadka hidde-side, iyo xogtaada caafimaadka ee kale la isticmaalo. Waxaad ka baran kartaa wax badan oo ku saabsan ku-camalfallada asturnaanta ee Caris, oo ay ku jiraan macluumaadka ku saabsan sida muunada(ha), macluumaadka hidde-side, iyo xogta caafimaadka ee kale ee aqoonsiga laga masaxay loogu isticmaali karo ganacsi ahaan loona wadaagi karo gudaha ama dibadda waddanka Maraykanka adigoo booqnaya www.CarisLifeSciences.com/privacy-us.



Caris MPI, Inc. d/b/a Caris Life Sciences ©2023 Caris MPI, Inc. Dhammaan xuquuqaha way dhawrsan yihiin. TN0892 v1 10 OCT 2023

## OGGOLAANSHAHA BUKAANKA

### Saxiixidda hoos waxay ka dhigan tahay:

- Waxaan qirayaa inaan akhriyey oon fahamsanahay macluumaadka lagu bixiyey foomkan, oo ay ku jirto wixii ku saabsan ujeedada iyo faa'idooyinka, halisaha, iyo caqabadaha suurtogalka ah ee baaritaanka iyo sida muunadayda(hayga), macluumaadka hidde-side, iyo xogtayda caafimaadka ee kale loo isticmaali karo, hayn karo, oo loo shaacin karo. Waxaan kala hadlay bixiyahayga daryeelka caafimaadka ee amray baaritaankayga kalsoonida lagu qabi karo natiijooyinka baaritaanka ee tilmaamaya tognaanta ama tabnaanta cudurka iyo heerka hubantida in natiijada sheegaysa tognaanta cudurka ee cudur ama xaalad ay tahay sadaal cudurka noocan ah inuu jiro.
- Waxaan qirayaa inaan fursad u helay aan su'aalo ku waydiiyo, oo wixii su'aalo ahna looga jawaabay qaab aan ku qancay.
- Waxaan si ikhtiyaari ah u oggolaaday inay Caris baaritaanka samayso una qaaddo, isticmaasho, hayso, joogtayso, iyo shaaciso muunaddayda, macluumaadka hidde-side, iyo xogta caafimaadka ee kale sida kolba loogu baahdo si loo sameeyo baaritaanka iyo ujeedooyinka kale ee lagu faahfaahiyey foomkan, oo ay ka mid yihiin cilmi-baaris, alaab soo saarid, iyo daabacaad, ilaa heerka uu oggol yahay sharcigu, iyo iyadoo la raacay shuruucda khuseeya arrintan. BUKAANNADA MINNESOTA OO KALIYA: Waan fahamsanahay in oggolaanshaha hore ee shaacinta macluumaadkayga hidde-side ay shaqaynayso muddo hal sano ah laga bilaabo taariikhda saxeexayga hoose.
- Waxaan fahamsanahay una oggolahay Caris inay hesho lacagta adeegyada, waxaanan u qoondeeyey dhammaan faa'idooyinkayga iyo lacagaha hoos taga qorshahayga caymiska caafimaadka (oo ay ku jiraan Medicare iyo Medicaid) Caris. Waxaan u xilsaaray Caris inay noqoto wakiil idman marka la eego inay u gudbiso sheegashooyinka, racfaanada, iyo/ama ashkatooyinka caafimaad hay'adaha qorshaha caafimaadka ama hay'adda dawliga ah ee maamusha qorshayaashan. Ballantan waxa ka mid ah dhammaan xuquuqda la xiriirta sheegashada, xaqa, ama eedaynta (maxkamad gaynta) laga yaabo inaan ku sameeyo qorshahayga caafimaadka.
- Waxaan u oggolahay Caris inay igu matasho go'aaminta, diidmada iyo/ama wixii rafcaan daruuri ah ee la xiriira cayminta adeegyada shaybaarka ee ay bixiso Caris, sidoo kalena ugu oggolahay Caris iyo lacag-bixiyaha dhinaca saddexaad inay bixiyaan wixii macluumaadka caafimaadka ee ilaashan ah iyadoo ujeedadu tahay xal ka gaarista sheegashadayda iyo/ama racfaankayga.
- Caris waxa dhici karta inay iila soo xiriirto mustaqbalka wixii ku saabsan fursadaha cilmi-baaris ee suurtogal ah ee ay dhici karto inaan mutaystay. Waan fahamsanahay inayna sinaba iigu waajib ahayn inaan ka qaybqaato wixii cilmi-baaris ah ee dartii la iila soo xiriiro, oo aan ku wargelin karo Caris iimeyl ahaan aniguu farriinta ku hagaajinaya PatientNavigator@CarisLS.com haddii aanan rabin in la ila soo xiriiro mustaqbalka wixii ku saabsan fursadaha cilmi-baariseed.
- Waxaan la xiriiri karaa Caris, anigoo iimeyl ahaan farriin ugu diraya PatientNavigator@CarisLS.com, markii aan rabo si aan uga laabto oggolaanshahayga ku aaddan haynta muunadayda(hayga), macluumaadka hidde-side, iyo xogtayda caafimaad ee kale. Hase yeeshee, ka laabashadaydu wax saamayn ah ku yeelan mayso waxyaalaha soo socda: (i) in wixii muunad ah, macluumaadka hidde-side ah, iyo wixii xogta caafimaad ee kale ah aqoonsiga laga masaxay oo aan aniga la ila xiriirin karin; (ii) wixii isticmaal ama wadaagista muunadaha ah, macluumaadka hidde-side ah, iyo xogta caafimaadka ee kale ah ee hore u dhacay, ama (iii) ilaa muddada Caris ay tahay inay hayso muunada(ha), macluumaadka hidde-side, iyo xogta caafimaad ee kale si ay ugu dhaqanto sharciga arrintan khuseeya.
- Inaan oggolahay ruqsadna u siiyey Caris (iyo wakiiladeeda, qandaraaslayaasheeda iyo cidda kale ee iyada matalaysa) inay i soo wacaan ama farriimo ii soo diraan, oo ay ka mid yihiin farriimahaas qaar hore loo sii duubay ama codad kombiyuutar sameeyey, ama ii soo diraan wax kastoo taleefanada iyagu wicitaanka iskooda u sameeya ah ama nidaam kasta oo kale oo iswada markay soo wacayaan ama farriimaha u soo dirayaan wax ka mid ah lambarrada taleefanada anigu (ama bixiyahayga daryeelka caafimaad oo matalayaa) uu siiyey Caris. Wicitaanadani ama farriimahani waxa dhici karta inay la xiriiraan baaritaano uu amray bixiyahayga daryeelka caafimaadka, bayaanada xisaabta bukaanka, alaabta ama adeegyada Caris dareensan tahay inaan danayn karo, ama codsiyada jawaabcelinta bukaanka. Waan fahamsanahay in tirada wicitaanka iyo farriinta qoraalka ah ay sida badan isbaddali karaan, inayna jirin wax xadaynaya tirada wicitaanada ama farriimaha qoraalka ah ee Caris ii soo diri karto, iyo inay lacag iga qaadi karto shirkadda taleefankayga wicitaanadan iyo farriimahan qoraalka ah oo Caris aysan ka masuul ahayn kharashkooda. Waan oggolahay in wicitaanada ama farrimaha qoraalka ah ee noocan ah la ii soo diro iyagoon wakhti gaar ah ku xirnayn, iyo xataa haddii lambarka taleefankaygu uga diiwaangashan yahay gobolo ama fadaraalka liiska Lambarrada Aan La Wici Karin. Waan fahamsanahay in farriimaha qoraalka ah ay dhici karto inaan baasweedh lagu xirin oo ay jirto halista in macluumaadka farriimaha sidaan ay akhriyi karto cid aan loogu talagalin. Waan fahamsanahay in Caris aysan dammaanad qaadi karin ammaanka iyo qarsoodiga farriimaha qoraalka ah ee ay ii soo dirto. Waxaan oggolahay in Caris aysan ka masuul ahayn wixii ah helitaanka aan fasax loo haysan ee yimaadda muddada ama kadib marka farriimaha qoraalka ah la ii soo dirayo/diro. Sidoo kale waxaan fahamsanahay in si aan iskaga joojin karo farriimaha qoraalka ah, aan ku jawaabi karo JOOJI wixii farriin qoraal ah ee aan helo. Si aad iskaga joojiso wicitaanada taleefanka ama farriimaha codka ah, waxaad kala xiriiri kartaa Taageerada Macmiilka lambarka 1-888-979-8669.
- BUKAANNADA WYOMING OO KALIYA: Waan fahamsanahay inaan xaq u leeyahay inaan fiiriyo, saxo, oo aan helo macluumaadkayga hidde-sidaha oo aan codsan karo burburinta macluumaadkayga hidde-side shuruudo gaar ah markay jiraan iyadoo la raacayo Qaynuunka Wyoming § 35-32-103. Tusaale ahaan, Caris waxa dhici karta inay diiddo codsigayga burburinta macluumaadkayga hidde-side haddii haynta macluumaadkaygu ay daruuri u tahay mid ka mid ah ujeedooyinka lagu faahfaahiyey Oggolaanshahan Bukaanka ee Baaritaanka Hidde-sidaha Kansarka.
- Haddii aan saxiixayo anigoo ka wakiil ah bukaanka, waxaan sidoo kale caddaynayaa inaan awood sharci ah u haysto inaan oggolaado anigoo bukaanka ka wakiil ah.

Magaca Bukaanka (far waawayn): ______________________________ Taariikhda: ______________

Bukaanka ama Saxeexaha Idman: ______________________________ Taariikhda: ______________


Caris MPI, Inc. d/b/a Caris Life Sciences ©2023 Caris MPI, Inc. Dhammaan xuquuqaha way dhawrsan yihiin. TN0892 v1 10 OCT 2023